**SHARCI LR.12**

**Taariikh: 21/09/2019**

**OGGOLAANSHO ANSIXINTA SHARCIGA**
**DHISMAHA GUDDIYADA MADAXBANNAAN EE LA DAGAALANKA MUSUQ-MAASUQA EE LABADA HEER**

**MADAXWAYNAHA J.F.S**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, ee Dastuurka KMG
**MARKUU ARKAY:** Qodobka 90aad, Xarafkiisa (F) ee Dastuurks KMG
**MARKUU ARKAY:** Qodobka 111aad, Xarafkiisa (1) ee Dastuurka KMG
**MARKUU ARKAY:** Warqadda Gudoomiyaha Golaha Shacabka Ref:167/12/01/B-10/19 taariikh 24/06/2019 kuna saabsan Sharciga Dhismaha Guddiyada Madaxabannaan ee la dagaalanka Musuq-maasuqa labada heer ee ay ansixiyeen Baarlamaanka
**MARKUU TIXGELIYAY:** Baahida loo qabo dhismaha Guddiyada Madaxabannaan ee la dagaalanka Musuq-maasuqa labada heer

**Waxuu Madaxwaynaha soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxwaynaha JFS saxiixo Sharcigan, waxa si rasmi ah loo oggolaaday ansixinta Baarlamaanka ee Sharciga Dhismaha Guddiyada Madaxabannaan ee la dagaalanka Musuq-maasuqa labada heer.

**Qodobka 2aad**

Marka uu Madaxweynaha JFS saxiixo Sharcigan, waxa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed.

**MUQDISHO: 21/09/2019**

Madaxweynaha J. F.S
**Maxamed Cabdullaahi Maxamed "Farmaajo"**

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka
Xafiiska Guddoomiyaha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مجلس الشعب
مكتب الرئيس

Somali Federal Republic
The House of the People
Office of the Speaker

Ref: GSh/67/12/01/B-10/19 :الرقم

Mogadishu June 24 2019 :التاريخ

Ku: Madaxweyanaha Jmahuuriyadda Federaalka soomaaliya

Og: Guddoomiyaha Aqalka Sare

Og: Ra'iisul wasaaraha Xukuumadda Federaalka

Og: Guddiga Garsoorka, Awqaaafta & Arrimaha Diinta .

Og: Garyqaanka Guud ee Dawladda

Og: Hantidhawrka Qaranka

Og: Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka

Og: Agaasimaha Waaxda Shuruucda ee Golaha Shacabka

**Ujeedo: Sharciga Dhismaha Guddiyadda Madaxabannaan ee la- Dagaalanka Musuq- Maasuqa ee labada heer**

Mudane Madaxweyne,

Sida aad la socoto, **Sharcigan Dhismaha Guddiyadda Madaxabannaan ee la-Dagaalanka Musuq-Maasuqa** ee halkaan ku lifaaqan waxa soo gudbisay Wasaaradda Cadaaladda XFS.

Kadib waxaa ka baaraandagey oo habraacii loogu talogaly marsiiyay Guddiga Garsoorka, Awqaafta iyo Arrimaha Diinta; iyadoo xildhibaanada Golaha Shacabka ay ka doodeen. Ugu danbayna wuxuu Goluhu ku ansixiyay Sharcigan Kalfadhiga 5-aad fadhigiisa 22-aad taariikhdu markay ahayd 24/6/2019 iyadoo 152 Xildhibaan xaadir yihiin, codayntuna sidaan ayay u dhacaday:

**Oggol: 149; Diiday: 1; Ka aamustay: 2;**

Hadaba M.ne Madaxweyne waxaan si waafaqsan qodobka 90aad xarafka (q) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka kaaga codsanayaa inaad go,aanka Golaha ku ogolaato xeer Madaxweyne, si loogu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawlada.

**Naga Guddooma Salaan Qiimo iyo Qadarin Xanbaarsan**

**M.ne Maxmaed Mursal Sheikh Abdirahmaan**
**Guddoomiyaha Golaha Shacabka BFS**

**Tell: +252 6 1 2224442 / +252-615577472**
**E-mail. speaker@parliament.gov.so mmursal44@hotmail.com**

# SHARCIGA DHISMAHA GUDDIYADDA MADAXABANNAAN EE LA-DAGAALLANKA MUSUQ-MAASUQA EE LABADA HEER

| Guddoomiye Golaha Shacabka  Baarlamaanka JFS | |
|---|---|
| Tirada Xubnaha Codeysay 152:  Oggol: 149;  Diiday: 1;  Ka Aamustay: 2; | |
| Saxiix: M.ne  Mohamed Mursal Sheikh Abdirahmaan | Taariikh: June 24, 2019 |

| Guddoomiye ku-xigeenka 1aad-  Golaha Shacabka Baarlamaanka JFS | |
|---|---|
| | |
| Saxiix: M.ne  Cabdiwali Ibraahim Sheekh Muudey | Taariikh: June 24,, 2019 |

| Guddoomiye ku-xigeenka 2aad-  Golaha Shacabka Baarlamaanka JFS | |
|---|---|
| | |
| Saxiixa: Mudane Mahad Cabdalla Cawad | Taariikh: June 24,, 2019 |

Ref: 386 /5/B-10/17 :الرقم

Mogadishu, 21st November 2017 التاريخ

**Ku:** **Guddoomiyaha Aqalka Sare;**
**Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya – Muqdisho**

---

**Ku:** **Guddoomiyaha Guddiga Garsoorka, Awqaafta iyo Arrimaha Diinta L/H. Golaha Shacabka**

---

**UJEEDDO:** **GUDBIN HINDISE SHARCIYEEDKA DHISMAHA GUDDIGA MADAXABANNAAN EE LA-DAGAALANKA MUSUQ-MAASUQA.**

M.ne Guddoomiye; Mudaneyaal;

Si aad ula socotaan, Hindise Sharciyeedka Dhismaha Guddiga Madaxabannaan ee La-dagaalanka Musuq-maasuqa ee halkan ku lifaaqan waxaa soo curiyey Wasaaradda Cadaaladda, waxaana si waafaqsan Qodobka 80(1) (a) ee Dastuurka Federaalka, Golaha Shacabka usoo gudbiyey Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka oo codsaday in sharcigan loo ansixiyo. Markii ay taariikhda ahayd 24/07/2017 waxaa Golaha Shacbiga Kalfadhigiisa 2-aad Kulankiisa 4-aad akhrinta koowaad ka jeediyey Wasiirka Wasaaradda Cadaaladda.

Ka dib markii Guddiga Garsoorka, Awqaafta iyo Arrimaha Diinta oo xilkan u abbaaran uu kasoo baaraandegay soona mariyey habraaca sharcidejinta ku xusan Qodobbada 44-aad ee Xeer-Hoosaadka Golaha Shacabka, wuxuu Goluhu Kalfadhigiisa 2-aad Kulankiisa 29-aad ee 13ka Nofeembar 2017 ansixiyey Hindise Sharciyeedka ujeeddada sare ku xusan, oo aan halkan idinku soo gudbineyno si waafaqsan Qodobka 82 (1) (a) ee dastuurka si waajibaadkiina dastuuriga u gudataan.

Taniyo intii ay Soomaaliya qaadatay nidaamka sharcidejinta laba-aqalleedka, Hindise-Sharciyeedkan waa kii 3-aad oo ay Xukuumaddu naga soo codsatay in loo ansixiyo, ayadoo aanay weli noo dhamaystirnayn dejinta axkaamtii Xeer-hoosaadka lagu maarayn lahaa isla wada-hawlgalka labadeena aqal ee Baarlamaanka Federaalka. Saa daraadeed waxaan mar kale adkeynaya in, sida labada Guddi Joogto ee labada aqal horey ugu wada heshiiyeen, dedeg u hawlgalaan labada Guddi Xeer-hoosaad ee labada aqal ay si wadajir ah usoo dhamaystiraan cutubyada lagama maarmaanka ah ee loo baahan yahay in lagu kordhiyo xeer-hoosaadyadeena, si aan u yeelano nidaam cad oo lagu maareeyo habraaca ansixinta shuruucda iyo isla wada hawlgalka labada aqal ee Baarlamaanka Federaalka.

Ilaa iyo inta aan ka yeelaneyno axkaamta xeer-hoosaadka labada aqal ku hawlgalayaan ee kor ku sheegan, waxaa ila habboonaatay in aan halkan idinku soo lifaaqo **Xusuusqor iyo xogwarran** ku faahfaahsan marxaladaha uu soo maray hindise-sharciyeedkan iyo habraaca lagu soo maareeyey ka hor inta Golaha Shacabku ansixin. Xusuusqorkan iyo xogsiintaba waxaan ugu gol leenahay oo keliya si xubnaha Aqalka Sare ay xog ogaal u noqdaan iyo si ay idinku fududaato gudashada waajibaadkiina dastuuriga ah, si waafaqsan Qodobka 82 (2) ee Dastuurka Federaalka. Sidoo kale, si wadashaqaynta labada aqal aan uga dhigno mid si wax-ku-ool u falgasho, waxaan ku talineyna in Guddiga Aqalka Sare ee u xilsaaran arrimaha Garsoorka, haddii uu doorbido ama xog dheeraad ah uu uga baahdo, in uu toos ula xiriiro Guddiga Garsoorka, Awqaafta iyo Arrimaha Diinta ee Golaha Shacabka. Guddoomiyaha Guddiga Garsoorka, Awqaafta iyo Arrimaha Diinta Golaha Shacabka, oo ogeysiis ahaan noo akhtisanayo, waxaa la faraya in uu si buuxda ula shaqeeyo Guddiga mataankiisa ah ee Aqalka Sare.

Haddii Hindise Sharciyeedka Dhismaha Guddiga Madaxabannaan ee La-dagaalanka Musuq-maasuqa aan halkan idinku soo gudbinay uu Aqalka Sare sidiisa ku ansixiyo, asagoo aan wax wa-ka-beddel ah ku samayn, waxaan idinka codsanayna inaad noo soo gudbisaan Qaraarka aad ku ansixiseen, si aan ugu wargelino Golaha Shacabka, uguna dirno saxiixa iyo meelmarinta Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jumhuuriyadda, si waafaqsan Qodobka 82 (3) ee Dastuurka.

Haddise ay dhacdo in Aqalka Sare uu Hindisahan qodobbo ka mid ah ku samayo wax-ka-beddel ama uu gebi ahaantiisuba diido, waxaa markaas waajib noqonaysa in Aqalka Sare Qaraarkiisa Baarlamaaniga uu hindisaha ugu soo celinaayo Golaha Shacabka uu soo raaciyo Xusuusqor iyo xogwarran oo uu ku sababaynayo wax-ka-beddelka uu ku sameeyey qodobka ama qodobbada hindisaha ama diidmadiisa gebi ahaaneed. Golaha Shacabku, inta aan Madaxweynaha loo gudbin ka hor waxaa markaas u bannaan waajib dastuuri ku ah, in uu hindisaha dib ugu noqdo si uu u guto xilkiisa dastuuriga ah, oo go'aan uga gaaro si waafaqsan Qodobka 82 (4) ama 82 (5) hadba middii la habboonata.

**M.ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawari"**
**Guddoomiyaha Golaha Shacabka Soomaaliya**

Og: Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Muqdisho

---

Og: Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka
Muqdisho

---

Og: Wasiirka Wasaaradda Cadaaladda
Muqdisho

---

Og: Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka
L/H. Xarunta Golaha Shacabka

**XUSUUSQOR Lr. 4**

Ka: Guddomiyaha Golaha Shacabka Soomaaliya
Ku: Guddoomiyaha Aqalka Sare

**Taariikh: Muqdisho,** 21/11/2017

**Ujeeddo:** **Xogwarran lagu faahfaahinaayo marxaladaha iyo ansixinta uu soo maray Hindise Sharciyeedka Dhismaha Guddiga Madxabannaan ee La-dagaalanka Musuqmaasuqa.**

Gogoldhig

Xusuusqorkan waxaa ku lifaaqan Hindise sharciyeedka Dhismaha Guddiga Madaxabannaan ee La-dagaalanka Musuqmaasuqa oo Golaha Shacabku ansixiyey.

Xusuusqorkan waxaa looga gol leeyahay keliya in lagu faahfaahiyo heerarka uu soo maray iyo habraaca Golaha Shacabku ku soo maareeyey si waafaqsan Qodobka 82 (1) ee Dastuurka Federaalka, iyo in Golaha Aqalka Sare la siiyo xogwarran waafi ah si ay ugu fududaato in ay waajibkooda dastuuriga ka gutaan si waafaqsan Qodobka 82 (2) ee Dastuurka. Marxaladaha uu soo maray Hindise Sharciyeedka

**Hindise Sharciyeedka Dhismaha Guddiga Madaxabannaan ee La-dagaalanka Musuqmaasuqa wuxuu soo maray maraxaladaha soo socda:**

**a)** Xukuumadda Federaalka Soomaaliya waxay markii ay taariikhdu ahayd 19/07/2017 Hindisahan usoo gudbisay Golaha Shacabka ee Baarlamaanka 10-aad;

**b)** Goluhu wuxuu Akhrinta 1-aad ka dhegeystay Wasiirka Cadaaladda markay taariikhdu ahayd 24/07/2017. Kulankaas oo xildhibaanada fursad u siiyey inay Wasiirka ka xogwareystaan mashaakilka dalka ka jira oo sharcigan uu xaallinaayo haddii la ansixiyo iyo culayska maaliyadeed uu sanadka 1-aad ku kordhinayo miisaaniyadda qaranka, si waafaqsan Qodobka 44-aad Faqradda 4-aad ee Xeer-Hoosaadka Golaha Shacabka;

**c)** Waxaa kaloo xildhibaanada u kuurgaleen kana wareysteen marxaladaha wadatashiga uu hindisuhu soo maray. Wasiirku wuxuu Golaha ku wargeliyey sida soo socota:

**I.** Taariikhdu markay ahayd 22/06/2017 waxaa Hidisahan ansixiyey Golaha Wasiiradda Xukuumadda Federaalka;

**II.** 24/07/2017 Hindisaha waxaa loo gudbiyey Guddiga Garsoorka, Awqaafta iyo Arrimaha Diinta ee Golaha Shacabka.

**III.** Guddiga muddadii ka baaraandegidda Hindisaha wauxuu fursad u helay:

1. Cilmi-baaris kooban ku sameeyo arrimaha, ujeeddooyinka iyo nuxurka ku xusan Hindisuhu xambaarsan yahay;
2. In uu wada-xaajood la galo Wasiirka oo ay wehliyeen khubaro ka tirsan waaxyaha kala duwan ee wasaaradda; iyo,

IV. Akhrinta 2-aad waxaa la qabtay 28/10/2017.

V. Guddiga wuxuu siiqo ahaan toosin ku sameeyey meelo badan, ayadoo la tixgelinaayo talooyinka iyo soojeedimaha xildhibaanada, wuxuu wax-ka-beddel ama wax-ku-kordhin ku sameeyey meelaha soo socda:

1. Qodobka 1-aad waxaa siiqo ahaan u beddelay "Faqradda beddelaada sharci Lr.10 ee 13/02/68 waxaa laga dhigay qodobka 51aad"
2. Qodobka 2-aad waxaan u beddelnay sida soo socota: **"(1).** Ujeeddada ugu weyn ee Xeerkan wuxuu xambaarsan yahay waxaa weeye horumarinta & adkaynta tallaabooyinka lagu joojinayo lagulana dagaalamaayo Musuq Maasuqa ka dhaca Qaranka gudihiisa ama dibadiisa ee ay ku kacaan Saraakiisha Dawladda. **(2)** Xisaabtanka & habsami u maamulka hawsha Qaranka, iyadoo la ilaalinayo danta dadweynaha soomaaliyeed iyo hantida ummadda oo laga dhawro boob iyo kutakrifalka aan sharciga waafaqsanayn. **(3)** InSaraakiisha Dawladda laga ilaaliyo in ay ku xadgudbaan xilalkooda & waajibaadkooda qaran.
3. Qodobka 3-aad waxaan ku kordhinay Faqaradaha **b, t, j, x**, iyo **kh**.
4. Qodobka 4-aad waxaa la kala hormariyey Qodobka 4-aad iyo 5-aad waxaa la beddelay kaliya "balse wuxuu xarumo ku yeelanayaa Xarumaha Maamul Goboleedyada xubnaha ka ah J.D.F.S.
5. Qodobka 8-aad waxaa meesha laga saaray qoondada loo xiray dumarka, waxaana Faqradda 3-aad lagu kordhiyey "Qorista Hawl-wadeena waxaa la raaca hab-qorista u degsan Xeerka shaqaala Dawladda"
6. Qodobka 10-aad waxaa lagu kordhiyey "in uu aqoon u leeyahay baaritaanka kiisaska musuq-maasuqa"
7. Qodobka 11-aad waxaa la beddelay dhaarta xubnaha, waxayna u dhacaysaa sida ku xusan Qodobka 104aad ee Dastuurka Federaalka.
8. Qodobka 14-aad waxaa laga beddalay Faqradda 2-aad oo laga dhigay "Xilkaqaadista waxaa lagu curin kara tiro hal dheeri ah xubnaha" waxa kaloo la beddelay areyga Baarlamaanka oo laga dhigay Golaha Shacabka.
9. Qodobka 15-aad waxaa la beddelay "Magacaabista Xubnaha" waxaana laga dhigay "Doorashada Madaxda Guddiga".
10. Qodobka 18-aad waxaa la beddelay kaliya "Mar kale looma dooran karo" waxaana laga dhigay "Mar kale looma magacaabi karo".
11. Qodobka 22-aad Faqradda 5-aad waxaa laga dhigay "Xoghayuhu wuxuu marayaa dhaarta Xafiiska si waafaqsan qodobka 104-aad ee Dastuurka Federaalka.
12. Qodobka 25-aad Faqradda 1-aad waxaa baa lagu kordhiyey ayadoo lagu soo daray Faqradda 2-aad oo cusub.
13. Qodobka 27-aad waxaa lagu sameeyey wax-ka-beddel iyo wax ku kordhin oo waxaa laga dhigay "**Ku eedaynta dembiga musuq-maasuq: (1)** Haddii uu Guddigu xaqiijiyo in sarkaal dawladeed ama qof kale uu geystay fal-dembiyeed

musuq-maasuq ah, dadkaasi waxaa lagu eedeyn doonaa nooca dembiga musuq-maasuqa ee ay galeen; **(2)** Guddigu wuxuu dacwadda eedeysanayaasha u gudbin doona Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka si uu uga qaado tallaabada ku habboon ee sharciga waafaqsan.

14. Qodobka 28-aad waxaa laga dhigay "Xeerkani wuxuu xakameynayaa muwaaddiniinta soomaaliyeed iyo dadka haysta jinsiyada soomaaliyeed oo Dalka Dibaddiisa ku gala dembi ku aaddan musuq-maasuq nooc kasta ha ahaato, waxaa lagu dabaqi doona xeerkan, iyadoo loo cuskanaayo mabda' ku xusan qodobka 8aad ee Xeer Ciqaabta Soomaaliyeed"
15. Qodobka 29-aad waxaa laga dhigay sidatan: "**(1)** Guddigu wuxuu bilaabi karaa baaritaan markii u sugnaado in uu dhacay dembi musuq-maasuq, ha ahaato mid uu isagu curiyey ama mid ku salaysan ***ashtako*** uu u gudbiyey qof caadi ah ama hay'ad kasta oo sharci ku dhisan; **(2)** Guddigu inta uu ku guda jiro baaritaan, wuxuu xaq u leeyahay inuu u yeero qof ama wakiil hay'ad oo uu rumeysan yahay in laga heli karo macluumaad dheeri ah oo kaalin weyn ka qaadan karo hawsha barista dembiga musuq-maasuqa; **(3)** Natiijada ka soo baxa baaritaanka, Guddigu wuxuu u gudbin doona cidda ku shaqada leh si ay uga qaadato tallabada xeerkan waafaqsan; **(4)** Habka loo ogaado haddii musuq-maasuqa lagu kacay, dadweynaha way ka xiran tahay.
16. Qodobka 30-aad Faqradda 1-aad waxaa laga saarey xarfaha b iyo t, sidoo kale waxaa lagu soo kordhiyey faqrad 2-aad oo loo dhigay sidatan "Sarkaal Dawladeed kasta ama shakhsi kaleba ee lagu waajib yeelay in uu ka-warbixiyo falalka la xiriira musuq-maasuqa sida uu qabo sharcigani ee si ogaal ah uga baaqsada in uu soo sheego falalkaas waxaa lagu eedeynayaa dembiga waajib-gudasho la'aan (omission) oo ku xusan Qodobka 255 ee Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.
17. Qodobka 31-aad waxna waa lagu kordhiyey waxna waa laga beddelay oo loo loo qoray sidatan "Guddigu waxaa waajib ku ah in uu ilaaliyo in aan la kashifin qof kasta oo sheega warka dhaliyey in ay curiso baaritaan ku salaysan Xeerkan ama qof kale oo bixiyey hadal qoraal la xiriira wax kasta oo kamid ah baaritaanka si uusan qof kaasi naftiisa & sharaftiisa waxyeelo ka soo gaarin xogta uu bixiyay".
18. Qodobka 33-aad waxaa siiqo ahaan loo toosiyay lagana dhigay "Sida waafaqsan XHC, Guddigu inta uu ku guda-jiro baaritaanada la xiriira dembiyada musuq maasuqa wuxuu awood u leeyahay in uu".
19. Qodobka 34-aad waxaa la mideeyey Faqradda 1-aad Xarafka (t) iyo Faqradda 2-aad oo isku si u qorneyd.
20. Qodobka 36-aad waxaa laga jaray Faqradda 2-aad oo soo noqnoqotay waxaana laga dhigay "Haddii sarkaal dawladeed ama qof kale uu diido in uu soo celiyo hanti si xaaraan ah lagu hantiyey ama uu dib u bixiyo qiimaha lagu helay mudnaanshiyo gaar ahaaneed ama si ka-faa'iidaysiyo ah, wuxuu Guddigu ka codsanayaa Maxkamadda in ay go'aamiso qiimaha hantidaas, iyo lawareeggasteeda oo lagu shubo khasnada dawladda".
21. Qodobka 38-aad Faqradda 1-aad waxaa laga saaray "isagoo u gudbinaya Golaha Wasiirrada si ay umeel-mariyaan". Farqadda 3aadna waa laga saaray "iyo u-gudbinta soo jeedin qoraal ah Golaha Wasiirrada"

22. Qodobka 40-aad waxaa laga tiray xarafkiisa (b)
23. Qodobka 42-aad waxaa siiqo ahaan loo beddelay **"Kormeerid iyo Warbixin"**
24. Qodobka 44-aad waxaa siiqo ahaan la toosiyey Cinwaanka ereyada "Dowladda" iyo Faqradda 1-aad oo lagu xusay "Hanti-dhowraha Guud ee Qaranka iyo Xisaabiyaha Guud ee Dowladda"
25. Qodobka 51-aad waxaa laga soo qaaday Qodobka 1-aad baragaraafka ugu dambeeya waxaana laga dhigay qodob sidiisa u yaala noqonayana "Xeerkan wuxuu beddelaaya Sharci Lambarkiisu yahay 10 ee soo baxay 13ka Feberaayo 1968, kuna saabsanaa dhismaha Xafiiska baariska musuq-maasuqa".

**VI.** Akhrinta 3-aad waxaa la qabtay 13/11/2017 wuxuuna Golaha Shacabku Kalfadhigiisa 2-aad Kulankiisa 29-aad, oo ay goobjoog yihiin 156 xildhibaan codeynaya Hindisahan Sharciyeed ku ansixiyeen 141 Oggol ah, ayadoo aysan jirin cid Diiday ama ka aamustay.

## 1 ARRIMAHA KA BAARAANDEGGA

Arrimaha ugu muhiimsana ee laga baaraandegay xilliyadii hindisuhu soo maray heerarka kala duwan waxaa ka mid ahaa kuwa halkan hoose ku xusan:

a. Qodobka 38-aad waxaa laga dhigay "Guddigu wuxuu dejinayaa isla markaana hirgelinayaa istiraatijiyad looga hortagayo musuqmaasuqa",

b. Qodobka 44-aad Faqradiisa 1aad waxaa lagu kordhiyey "Hanti-dhowrka Guud ee Qaranka iyo Xisaabiyaha Guud ee Dawladda".

## 2 GUNAANAD

Haddii loo baahdo faahfaahin ama xog dherrad ah, waxaad si toos ah ula xiriiri kartaan M.ne Shariif Shekhuna Maye, oo ah Guddoomiyaha Guddiga Garsoorka, Awqaafta iyo Diinta oo aan horey u farnay in si buuxda idin kala shaqeeyo wixii aad uga baahataan, waxaadna kala xiriiri kartaan:
Telefoon: 061 2889999, Email: shariifmaye@hotmail.com

# ANSIXINTA SHARCIGA DHISMAHA GUDDIYADA MADAXA-BANNAAN EE LA-DAGAALLANKA MUSUQ-MAASUQA EE LABADA HEER

| Senatarrada Codeeyay | Oggolaaday | Diiday | Ka Aamusay |
|---|---|---|---|
| 31 | 31 | 0 | 0 |

| Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare<br>Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya | |
|---|---|
| Sen. Cabdi Xaashi Cabdullaahi | Taariikh: 05ta Diseembar 2018 |

| Guddoomiye Ku Xigeenka Kowaad ee Golaha Aqalka Sare<br>Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya | |
|---|---|
| Sen. Abshir Maxamed Axmed | Taariikh: 05ta Diseembar 2018 |

| Guddoomiye Ku Xigeenka Labaad ee Golaha Aqalka Sare<br>Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya | |
|---|---|
| Sen. Mowliid Xuseen Guhaad | Taariikh: 05ta Diseembar 2018 |

Mahdi

Ha la ~~13 copy~~ badiyo

# JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

# SHARCIGA DHISMAHA GUDDIYADA MADAXABANNAAN EE LA-DAGAALLANKA MUSUQ-MAASUQA EE LABADA HEER

149 HAA
1 MAYA
2 AAMUS

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA GOLAHA SHACABKA
THE FEDERAL PARLIAMENT OF SOMALIA

# ANSIXINTA SHARCIGA DHISMAHA GUDDIYADA MADAXA-BANNAAN EE LA-DAGAALLANKA MUSUQ-MAASUQA EE LABADA HEER

| Senatarrada Codeeyay | Oggolaaday | Diiday | Ka Aamusay |
|---|---|---|---|
| 31 | 31 | 0 | 0 |

| Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare<br>Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya | |
|---|---|
| Sen. Cabdi Xaashi Cabdullaahi | Taariikh: 05ta Diseembar 2018 |

| Guddoomiye Ku Xigeenka Kowaad ee Golaha Aqalka Sare<br>Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya | |
|---|---|
| Sen. Abshir Maxamed Axmed | Taariikh: 05ta Diseembar 2018 |

| Guddoomiye Ku Xigeenka Labaad ee Golaha Aqalka Sare<br>Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya | |
|---|---|
| Sen. Mowliid Xuseen Guhaad | Taariikh: 05ta Diseembar 2018 |

Sharci Lr. ________ ee __________

Sharciga Dhismaha Guddiyada Madaxabannaan ee La-dagaallanka Musuq-maasuqa ee Labada Heer

## CUTUBKA KOOWAAD
## HORDHAC

### Qodobka 1aad
### Xeerka Dhismaha Guddiyada Madaxa-bannaan ee La-dagaallanka Musuq-maasuqa ee Labada Heer

1. Xeerkan waxaa lagu dhisayaa Guddiga Madaxa-bannaan ee La-dagaallanka Musuq-maasuqa ee heer federaal si waafaqsan Qodobka 111C ee Dastuurka KMG ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Hadda wixii ka dambeeya waxaa loogu yeerayaa Guddiga Madaxa-bannaan ee La-dagaallanka Muusuq-maasuqa.
2. Sidoo kale, xeerkan waxa lagu dhisayaa Guddiyada madaxa bannaan ee La-dagaallanka Musuq Maasuqa ee Heer Dowlad Goboleed si waafaqsan faqradda 1aad ee Qod.111aad ee DKMG ah. Guddi kasta waxaa loogu yeerayaa Guddiga Madaxa Bannaan ee La Dagaallanka waxaana la raacinayaa magaca Dowlad Goboleedka.

### Qodobka 2aad
### Qeexid

Iyadoo la eegayo ujeeddada Xeerkan, erayada soo socda waxaa mid walba lagu micnaynayaa sida ku hor qoran:

**b) Musuq-maasuq**: waxaa loola jeedaa in Sarkaalka Dawladdu uu jebiyo qodobbada khuseeya dembiyada Musuq-maasuqa ee ku qeexan Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed ama Xeerkan.

**t) Noocyada Musuq-maasuqa:** laaluush, xatooyo xoolo dadweyne, ku dirqin laaluush, ku-dhiirri-gelin musuq-maasuq, ku xadgudub awood xafiiseed (eex, qaraabo-kiil, goboleysi iyo qabyaalad), ku daneysi hawl xafiis iyo been abuur qoraal dukumiinti.

**j) Sarkaal Guud**: waxaa loola jeedaa qof kasta oo si joogta ah ama si wakhtiyaysan oo mushaar, gunno ama abaal-gud ama waajib saaran dartii u gudanaya howl-guud oo xeer-dejineed, maamul, garsoor, danta Qaranka ama Hay'ad kale oo dawladeed awgeed.

**x) Qofka u xil saaran hawl guud**: waxaa loola jeedaa qof kasta oo aan ahayn Sarkaal Guud oo si joogto ah ama si wakhtiyeysan isagoo mushaar ama gunno ama abaalgud qaadanaya ama gudanaya waajib saaran uu Qaranku ama hay'adihiisa Dawladeed u xilsaareen gudashada hawl dan guud ah.

**kh) Qofka fulinaya hawl baahi guud**: waxaa loola jeeda qof kasta oo rayid ah oo ku shaqaysanaya mihnad sharci ama caafimaad ama mihnad kasta oo kale oo ku

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
جمهورية الصومال الفيدرالية
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

shaqaysigeeda uu sharcigu ku xiray heer aqooneed oo cayiman ama gudanaya hawl la caddeeyay in ay tahay baahi guud.

**d) Baarlamaanka Federaalka**: waxaa loola jeedaa labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.

**r) Guddiga, Dowladda, Saraakiisha Dawladda, Hay'adaha Dawladda, Laamaha Dowladda/Xafiisyo Dowladeed, Baarlamaanka, Laanta Sharci Dejinta, Xukuumadda, Golaha Wasiirada, Wasiirka Cadaaladda, Xeer Ilaalinta Guud, Hanti Dhawrka Guud, Xisaabiyaha Guud, Booliska, Maxkamadaha, Hay'adaha Garsoorka, Laanta Garsoorka, Guddiga shaqaalaha rayidka iyo shaqaalaha rayidka ah:** dhammaan ereyada halkan lagu soo koobay waxaa loola jeedaa, meel kasta oo lagu sheego xeerkan, micno ay soo wada gelayaan heer federal iyo heer dowlad goboleed.

**s) Dastuur, xeer iyo sharci:** waxa loola jeedaa micno ay soo wada gelayaan heer federal iyo heer Dawlad Goboleed.

## Qodobka 3aad

## Ujeeddada Xeerka

1. Ujeeddada ugu wayn ee Xeerkan uu xanbaarsan yahay waxaa weeye horumarinta iyo adkaynta tallaabooyinka lagu joojinayo, lagulana dagaallamayo Musuq-maasuqa ka dhaca Qaranka gudihiisa ama dibaddiisa oo ay ku kacaan saraakiisha Dowladda.
2. Isla xisaabtanka iyo habsami u Maamulka howsha Qaranka, iyadoo la ilaalinayo danta dadweynaha Soomaaliyeed iyo hantida Ummadda oo laga dhowrayo boob iyo ku-tagrifalka sharci darrada ah.
3. In Saraakiisha Dowladda laga ilaaliyo ku-xadgudubka xilalkooda iyo waajibaadkooda.

# CUTUBKA LABAAD

# GUDDIGA

## Qodobka 4aad

## Xarunta Guddiga Heer Federaal

Xarunta rasmiga ah ee Guddiga heer federaal waa Magaalo-madaxda Dalka ee Muqdisho, balse wuxuu laamo ku yeelanayaa Dawladaha Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka Soomaaliya, laamahaas oo wada shaqeyn toos ah la yeelanaya Guddiyada La Dagaallanka Musuq Maasuq ee heer dowlad goboleed.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA جمهورية الصومال الفيدرالية FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE

## Qodobka 5aad

## Maqaamka Sharciyeed ee Guddiyada La-dagaallanka Musuq-maasuqa

Guddiyada Madaxa-bannaan ee La-dagaallanka Musuq-maasuqa ee labada heer waxay leeyihiin shakhsiyad qaanuuneed oo u gaar ah guddiga kasta.

## Qodobka 6aad

## Xilka Guddiga

Xilka guud ee Guddigu waa:

1. In uu baaro eedaymaha ku saabsan musuq-maasuqa lagu soo oogo qeybaha kala duwan ee saraakiisha Dawladda.
2. In uu sameeyo baaris marka uu rabo, baarista Guddigana kuma koobna marka cabasho loo soo gudbiyo.
3. In uu horumariyo isla markaasna uu adkeeyo tallaabooyinka lagu joojinayo, lagulana dagaalamayo musuq-maasuqa sida ugu fiican uguna habboon.
4. In uu dhiirrigeliyo daacadnimada, isla-xisaabtanka iyo habsami-u-maamulka arrimaha dadweynaha iyo hantidooda.
5. In uu xilkiisa u guto si ka madax-bannaan Xukuumadda iyo xakamayn siyaasadeed, lagumana faro-gelin karo hawshiisa, wuxuuna mar walba u hoggaansamayaa Dastuurka iyo shuruucda kale.

## Qodobka 7aad

## Awoodaha Guddiga

Si waafaqsan Qodobka "111C" ee Dastuurka KMG ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, awoodaha Guddiga waxaa ka mid ah:

1. Ka-hortagga, baarista, iyo faafinta dacwooyinka Musuq-maasuqa ee dhacay.
2. Xayiraadda, qabashada, la-wareegidda iyo soo celinta faa'iidada fal-dembiyeedka laga helay iyagoo kaashanaya Hay'addaha Garsoorka ee awoodda u leh.
3. Taageerista dejinta hindise-sharciyeedyada iyo tallaabooyinka ku habboon ee lagu joojinayo ama lagu xakameynayo iyo qaadista fal-dembiyeedyada la xiriira musuq-maasuqa.
4. Baaxadda awoodda Guddiga uu leeyahay waxaa ka mid ah baarista arrimaha la xiriira:
   - **b)** Musuq-maasuqa ka dhaca Qaranka gudihiisa ama dibaddiisa ee lagu eedeeyo Saraakiisha Dowladda;
   - **t)** Boobka, dhicitaanka iyo leexsashada hantida Dawladda iyo hantida gaarka ah ee ay ku kacaan saraakiisha Dawladda;

j) Ku-takrifalka awoodda xafiiseed ee uu leeyahay sarkaalka dawladda; iyo

x) Si-xun u isticmaalka awoodda, hawlaha shaqada iyo ku hodmid sharci-darro ah.

5. U-kuurgelidda, ururinta iyo xaqiijinta macluumaadka eedeymaha musuq-maasuq ee lagu hadal-hayo bulshada dhexdeeda.
6. U-gudbinta Xafiiska Xeer-ilaalinta Guud natiijada baarista Guddiga ee la xiriirta fal-dembiyeedyada ka dhasha musuq-maasuqa hay'adaha Dawladda (gudaha & dibadda).
7. Baarista fal-dembiyeedyada ka dhasha Xeerkan ama lid ku ah sharciyada kale ee la xiriira arrimaha musuq-maasuqa oo ay iskood Guddigu u fuliyaan ama ku salaysan cabashooyin ay u soo gudbiyaan hay'adaha Dawladda, shakhsiyaad gaar ah ama hay'ado leh maqaam sharci.
8. Ka-talo-bixinta sidii loo sixi lahaa ama wax looga qaban lahaa hay'adaha iyo saraakiisha dawladda ee lagu eedeeyo in ay ku hawlan yihiin ama galeen arrimo musuq-maasuq.
9. Baarista fal-dembiyeedyada musuq-maasuq ee ka jira hay'adaha aan dowliga ahayn iyo shirkadaha ganacsi ee gaarka loo leeyahay (Gudaha & Dibadda) kuwaas oo ku lug leh Musuq-maasuq ay ku kaceen Saraakiisha iyo Hay'addaha Dowladda.
10. Soo-saaridda warbixin-sanadeed ku aaddan dhammaan eedaymaha iyo cabashooyinka musuq-maasuq ee soo gaaray Guddiga, cidda ay khuseeyeen, heerka ay gaarsiisan yihiin iyo natiijooyinka ka dhashay baaritaannadii uu sameeyay Guddiga marka laga reebo dacwadaha aan weli ka dhammaan Maxkamadaha.
11. Soo-bandhigidda iyo hirgelinta barnaamijyo wacyi-gelin oo lagu dhiirri-gelinayo bulsho-weynta sidii si wada-jir ah looga hortegi lahaa hab-dhaqanka musuq-maasuq.
12. Iskaashi iyo wada-shaqayn lala yeesho hay'adaha caalamiga ah, wakaaladaha iyo ururada kale, iyadoo dadaallo lagu bixinayo la-dagaallanka musuq-maasuqa nooc kasta uu yahay.
13. Diyaarinta miisaaniyad-sanadeed madax-bannaan ee uu yeesho Guddiga iyo xisaab-xirkeeda si waafaqsan nidaamka maaliyadda ee u degsan JFS iyo Dawladaha xubnaha ka ah Dawladda Federaalka Soomaaliya.
14. Wax-ka-qabadka hawlaha kale ee ku tilmaaman Xeerkan ama Xeerarka kale ee khuseeya arrimaha musuq-maasuqa, iyadoo lala kaashanayo hay'adaha kale ee ku hawlan isla arrimahan, sida Xafiiska Hanti-dhawrka Guud iyo Xafiiska Xeer-ilaalinta Guud.
15. Awoodaha ku xusan faqradaha kore waxa yeelanaya Guddiyada la-dagaallanka musuq-maasuqa ee labada heer marka laga reebo dembiyada musuq-maasuqa ee lagu galo dibedda iyo iskaashiga caalamiga, kuwaas oo u gaar ah Guddiga heer federaal.
16. Awoodaha Guddiga heer federaal waxay ku eg yihiin heer federal iyo Gobolka Banaadir. Awoodaha Guddiyada heer dowlad goboleed waxa ay ku eg yihiin heer dowlad goboleed.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA جمهورية الصومال الفيدرالية FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE

## Qodobka 8aad

## Miisaaniyadda Guddiga

1. Miisaaniyadda Guddigu waxay ka kooban tahay:

    b) Miisaaniyad ay u qoondeyso Dawladdu si loogu fuliyo qorshe-hawleedka Guddiga;

    t) Lacagaha iyo waxyaabaha kale ee qiimaha leh ee loogu deeqay ama la amaahiyay Guddiga si waafaqsan nidaamka maamulka Maaliyadda ee Dowladda.

2. Isticmaalka Miisaaniyadda Guddiga waxaa baaritaan ku sameynaya Xafiiska Hanti-dhawrka Guud.

## Qodobka 9aad

## Xubnaha Guddiga

1. Guddigu wuxuu ka kooban yahay 9 (Sagaal) xubnood oo xubin ka mid ah ay noqonayso Dadka Qaba Baahiyaha Gaarka ah, labo xubnoodna waxay ka imanayaan dumarka, waxayna kala yihiin;

    **b)** Guddoomiye;

    **t)** Guddoomiye Ku-xigeen; iyo

    **j)** Toddobo (7) xubnood oo kale.

2. Xubnaha Guddigu waa in ay ku sifoobaan madax-bannaani, hufnaan, dhex-dhexaadnimo iyo eex la'aan.

3. Guddigu wuxuu qoran karaa tiro hawl-wadeenno ah iyadoo lagu salaynayo baahidiisa shaqo, si kor loogu qaado wax-qabadkiisa, qorista hawl-wadeennada waxaa loo raacayaa nidaamka shaqo qorista ee Xeerka Shaqada iyo Shaqaalaha Dawladda.

## Qoddobka 10aad

## Xulista Xubnaha Guddiga

1. Xubnaha Guddiga ka mid noqonaya waxaa loo soo xulayaa sida soo socota:

**b)** Wasiirka Cadaaladda ayaa qabanaya hannaan tartan furan oo lagu soo xulayo 9 (sagaal) musharrax oo u qalma xubinnimada Guddiga, iyadoo xulista lagu soo dhammeystirayo muddo 60 (lixdan) maalmood gudahood ah, laga bilaabo maalinta uu sharcigani dhaqan-gal noqdo, waxaana loo gudbinayaa Golaha Wasiirada si ay u meel-mariyaan;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
جمهورية الصومال الفيدرالية
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

t) Golaha Wasiirradu waxay ku meel-mariyaan liiska musharixiinta muddo 15 (shan & toban) maalmood gudahood ah marka loo soo gudbiyo liiska, Golahuna wuxuu u gudbinayaa Barlamaanka si uu u ansixiyo.

j) Haddii aysan meel-marin Golaha Wasiirrada mid ama wax ka badan musharixiinta, Wasiirka Cadaaladda wuxuu markale u soo gudbinayaa magacyada musharixiintii kaalin ahaan ugu xigay muddo 7 (toddoba) maalmood gudahood;

x) Haddii uusan Baarlamaanku ansixinin qaar ka mid ah musharixiinta waxa ay muddo seddex maalmood gudahood ah ku wargelinayaan Golaha Wasiirrada, wuxuuna Goluhu ku soo gudbinayaa muddo todobo cisho ah magacyo beddel ah oo laga soo xulayo tartamayaashii ugu dhibcaha sarreeyay ee aan ku jirin magacyada loo gudbiyay Baarlamaanka.

Kh) Haddii Baarlamaanku uu diido dhammaan magacyada musharrixiinta ee loo gudbiyay, wuxuu ku wargelinayaa Golaha Wasiirada muddo toddobo maalmood gudahood ah, Goluhuna wuxuu dib u soo billaabayaa hab raaca qaadashada ee ku xusan faqradaha (b) iyo (t).

2. Haddii ay xubini banneyso xilkeeda, inta lagu gudo jiro muddada xil-haynta, waxaa la raacayaa habraac la mid ah kii hore, si loo buuxiyo xubinnimada bannaanaatay.

## Qodobka 11aad

## Shuruudaha Xubnaha Guddiga

Qofka loo dooranayo xubinta Guddiga waa in uu buuxiyaa:

b) Shuruudaha ku tilmaaman Xeerarka Shaqada iyo Shaqaalaha Dawladda;

t) Waa in uu haystaa shahaado jaamacadeed oo la aqoonsan yahay, sida sharciga, Shareecada, xisaabaadka, hanti-dhawrka, baarista dembiyada ama cilmiga siyaasadda ee la xiriira qaybahaas;

j) Marka la xulayo xubnaha Guddiga waa in la ilaaliyaa isu dheelitirka takhasusaadka xubnaha ka mid noqonaya Guddiga.

x) In uu leeyahay ugu yaraan 10 (toban) sano oo waayo-aragnimo xirfadeed oo xiriir la leh takhasusyada sare ku xusan;

kh) In uu yahay muwaadin Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;

d) In aan si kama-dambays ah loogu xukumin fal-dembiyeed gudaha dalka iyo dibaddaba, iyo

r) In uu leeyahay daacadnimo iyo anshax wanaag.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
جمهورية الصومال الفيدرالية
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
مجلس الشيوخ
AQALKA SARE

### Qodobka 12aad

### Dhaarinta Xubnaha Guddiga

1. Inta aan la guda-gelin shaqada, xubin kasta oo Guddiga heer federaal ka mid ah waxaa lagu hor dhaarinayaa Madaxweynaha JFS, dhaartaasina waxay u dhacaysaa sida ku xusan Qodobka 104 ee Dastuurka KMG.
2. Xubnaha Guddiyada heer Dawlad Goboleed waxay iyaguna ku hor dhaaranayaan Madaxeyneyaasha Dawladaha Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka, dhaarintooduna waxay u dhacaysaa sida ku xusan Qodobka 104 ee Dastuurka KMG.

### Qodobka 13aad

### Muddada Xil-haynta Xubnaha Guddiga

Muddada xil-haynta Xubnaha Guddiga waa 5 (shan) sano oo la cusbooneysiin karo mar keliya.

### Qodobka 14aad

### Shaqo-ka-joogsashada Xubnaha Guddiga

1. Xubinta Guddiga waxay shaqada ka joogsanaysaa haddii:
   **b)** Muddada xil-hayntu ka dhammaato;
   **t)** Uu iska casilo xilka;
   **j)** Uu gudan waayo xilkiisa sabab caafimaad ama sabab kale, ama ay ku timaado geeri;
   **x)** Xil-ka-qaadis lagu sameeyo anshax-xumo baahsan awgeed;
   **kh)** Uu isu sharraxo ama uu qabto xil siyaasadeed, mid maamul ama mid la-talin ee hay'ad dowli ah ama aan dowli ahayn.
2. Iyadoo la tixgelinayo soo-jeedinta Wasiirka Cadaaladda, Golaha Wasiirradu waxay u gudbinayaan Barlamaanka xubnaha musharixiinta cusub si loo ansixiyo, 3 (saddex) bilood ka hor inta uusan waqtigu ka dhammaan Guddigii hore, ama 30 (soddon) maalmood ka hor inta uusan waqtigu ka dhicin xubintii ka tegaysa xafiiska ka hor muddada xil-haynta.

### Qodobka 15aad

### Xil-ka-qaadis Xubin Guddiga

1. Xilka ayaa laga qaadayaa xubin Guddiga ka mid ah haddii:
   **b)** Uu la yimaado fal anshax-xumo baahsan oo ay isku raacaan Xubnaha Guddigu;
   **t)** Uu ku xad-gudbo Dastuurka ku-meel-gaarka ah ama shuruucda kale ee dalka u degsan si ula-kac ah;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
جمهورية الصومال الفيدرالية
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
مجلس الشيوخ

**j)** Uu isu sharraxo ama uu qabto xil siyaasadeed, mid maamul ama mid la-talin ee hay'ad dowli ah ama aan dawli ahayn.

**x)** Si kama-dambeys ah loogu xukumo fal-dembiyeed uu galay;

**kh)** Guddigu soo saaro in uu si ku-talo-gal ah ugu xad-gudbay Xeerkan ama Xeer-hoosaadyada Gudiggu dejiyo;

2. Hab-raaca xil-ka-qaadista xubin ka mid ah Guddiga waxaa lagu curin karaa qoraal codsi xil-ka-qaadis ah oo ay ku saxiixan yihiin saddex dalool laba dalool xubnaha Guddiga waxaana loo gudbinayaa Baarlamaanka.
3. Marka uu helo Baarlamaanku codsiga xil-ka-qaadista waxay 10 (toban) maamlmood Gudahood ah ku magacaabayaan Guddi baara eedeymaha loo soo jeediyay Xubinta in ay jiraan iyo in kale, kadibna wuxuu ku soo celinayaa warbixintiisa Baarlamaanka muddo 20 (labaatan) maamlmood ah oo ka bilaabata maalinta la magacaabay Guddiga. Haddii Baarlamanka uu ku qanco sababta xil ka qaadista, waxay muddo 5(shan) maalmood gudahood ah ku soo saarayaan go'aan xil-ka-qaadis si deg deg ah u dhaqan-gala.
4. Baarlamaanka Federaalku wuxuu u soo saarayaa go'aanka xil-ka-qaadista si waafaqsan qodobka 112 iyo madaxa 4$^{aad}$ ee cutubka 6$^{aad}$ ee DKMG ah.
5. Guddiga wuxuu shaqada ka joojin karaa xubin lala xiriiriyay xil-ka-qaadis inta la sugayo natiijada kama-dambeysta ah ee xilka looga qaadayo.

## Qodobka 16$^{aad}$

## Doorashada Guddoomiyaha iyo Guddoomiye Ku-xigeenka

Guddiga ayaa iska dhex dooranaya Guddoomiye iyo Guddoomiye Ku- xigeen, go'aanka Guddigana wuxuu u dhaqan gelayaa si deg deg.

## Qodobka 17$^{aad}$

## Xilka Guddoomiyaha

Guddoomiyaha ayaa hoggaaminaya guud ahaan shaqada Guddiga, si loo hubiyo dhaqan-galka hawlahiisa, waxaana laga doonayaa:

**b)** In uu maareeyo isla markaana kormeero hawlaha Guddiga;

**t)** In uu ansixiyo warbixinta sanadlaha ah ee Guddiga;

**j)** In uu soo diyaariyo miisaaniyadda sanadlaha ah ee Guddiga;

**x)** In uu go'aan ka gaaro xuquuqda iyo waajibaadka shaqaalaha Guddiga;

**kh)** In uu qabto hawlaha kale ee Guddiga si waafaqasan xeerkan.

## Qodobka 18aad

## Xilka Guddoomiye Ku-xigeenka

Guddoomiye Ku-xigeenku wuxuu Guddoomiyaha ka gacan-siinayaaa maamulka hawlaha shaqo ee Guddiga, si loo hubiyo in shaqada loo gutay si hufnaan iyo waxtar leh, waxaana xilkiisu yahay:

**b)** In uu buuxiyo kaalinta Guddoomiyaha Guddiga haddii uu shaqada ka maqan yahay ama sabab kale u awoodi waayo gudashada xilkiisa;

**t)** In uu qabto hawlaha kale ee uu u xilsaaro Guddoomiyaha Guddigu si waafaqsan xeerkan.

## Qodobka 19aad

## Muddada Xil-haynta Guddoomiyaha & Guddoomiye Ku-xigeenka

1. Muddada xil-haynta Guddoomiyaha iyo Guddoomiye Ku-xigeenka waa 5 (shan) sano oo la cusboonaysiin karo mar keliya.

## Qodobka 20aad

## Go'aannada Guddiga

1. Guddigu wuxuu kulankoodu ku guntamayaa seddex dalool laba dalool xubnaha Guddiga.
2. Guddigu wuxuu go'aannada ku gaarayaa cod hal-dheeri ah ee dhammaan xubnaha fadhigu ku guntamay.

## Qodobka 21aad

## Qaybaha Guddiga

Guddigu wuxuu yeelanayaa qaybaha soo socda, iyadoo qayb walba uu maamulayo xubin ka mid ah Guddiga, si waafaqsan go'aanka Guddoomiyaha, waxayna kala yihiin:

**b)** Ka-hortagga musuq-maasuqa;

**t)** Wacyi-gelinta bulshadda iyo tababarrada

**j)** Baaritaannada;

**x)** Xoghaynta;

**kh)** Qeybo kale haddii loo arko inay muhiim u yihiin in lagu soo kordhiyo hawlaha Guddiga.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

## Qodobka 22aad

## Warbixinnada Guddiga

1. Guddiga heer federaal wuxuu warbixintiisa sanadlaha ah u gudbinayaa Ra'iisul Wasaaraha, Baarlamaanka Federaalka iyo Madaxweynaha JFS.
2. Guddiga heer federaal wuxuu sidoo kale Barlamaanka Federaalka u gudbin karaa warbixin gaar ah marka ay ka codsadaan.
3. Guddiyada la-dagaallanka musuq-maasuqa ee heer dawlad goboleed waxay warbixinnadooda u gudbinayaan Madaxweynaha iyo Baarlamaanka dawlad goboleedka.

## Qodobka 23ad

## Xoghaynta

1. Guddigu wuxuu yeelanayaa xafiis xoghayn oo uu madax u yahay Xoghaye.
2. Guddigu wuxuu si qayaxan, daah-furan, lehna hannaan tartan shaqo-qoris, u xulayaa qof u qalma in uu noqdo Xoghayaha Guddiga, waxaana ansixinaya Golaha Wasiirrada.
3. Qofka loo xulayo in uu noqdo Xoghayaha Guddiga waxaa laga rabaa in uu:
   - **b)** Yahay Muwaadin Soomaali ah;
   - **t)** Haysta shahaaddo jaamacadeed oo la aqoonsan yahay;
   - **j)** Leeyahay ugu yaraan 10 (toban) sano oo waayo-aragnimo la xiriira qeybaha Sharciga, Maamulka Dawliga ah ama Hoggaamінta.
4. Xoghayaha ayaa ugu sarreeya shaqaalaha Guddiga, wuxuuna ku shaqeynayaa tilmaamaha iyo shuruudaha uu hadba Guddigu u dejiyo.
5. Ka hor inta uusan qaban jagada, Xoghayuhu wuxuu marayaa dhaarta xafiiska si waaqafsan qodobka 104 ee Dastuurka KMG.
6. Xoghayahu wuxuu gudashada hawlaha iyo waajibaadka xafiiska uga mas'uul yahay Guddiga.
7. Xoghayuhu waa:
   - **b)** Sarkaalka sare ee fulinta arrimaha Guddiga;
   - **t)** Sarkaalka xisaabaadka ee Guddiga;
   - **j)** Waxa uu mas'uul ka yahay:
     - i. Fulinta go'aannada Guddiga;
     - ii. Maamulka iyo maareynta maalinlaha ah ee arrimaha Guddiga;
     - iii. Kormeeridda shaqaalaha kale ee Guddiga;
     - iv. Gudashada waajibaadka kale ee Guddigu u xilsaaro.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
جمهورية الصومال الفيدرالية
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
مجلس الشيوخ
AQALKA SARE

## Qodobka 24aad

## Xil-ka-qaadista Xoghayaha

1. Si waafaqsan xeerka shaqaalaha rayidka ah ee Dowladda, Guddigu wuxuu isu soo jeedin karaa xil-ka-qaadista Xoghayaha haddii:
   - **b)** Uu gudan-waayo xilkiisa awood-darro xaga jirka ama maskaxda ah;
   - **t)** Lagu helo anshax-xumo baahsan;
   - **j)** Uu la yimaado karti-darro; ama
   - **x)** Uu ku xad-gudbo Dastuurka ama shuruucda kale.
2. Marka la soo jeediyo xil-ka-qaadista Xoghayaha ee lagu qeexay faqrada 1aad, Guddigu wuxuu si qoraal ah ugu wargelinayaa Xoghayaha sababaha keenay xil-ka-qaadistiisa, isagoo siinaya Xoghayaha fursad uu uga jawaab celiyo si qoraal ah.
3. Xil ka qaadista Xoghayaha Guddiga ee ku xusan faqradda 1aad waxay ku ansaxaysaa cod saddex dalool laba dalool dhammaan xubnaha Guddiga.

## Qodobk 25aad

## Shaqaalaha Guddiga

1. Xoghaynta waxay ka kooban tahay:

**b)** Sarkaal xirfadeed, mid farsamo, mid maamul iyo shaqaale gacan ka siiya howlahooda, waxaana loo soo xulayaa si waafaqsan xeerka Shaqaalaha Rayidka ee dawladda.

**t)** Iyadoo laga jawaabayo codsiga Guddiga, Guddiga Shaqaalaha Rayidka ayaa u soo gudbinaya Guddiga saraakiisha ay codsadeen;

**j)** Sida ujeeddada xeerkan ay tahay, sarkaalka guud ee loo soo jeediyey Guddiga si waafaqsan faqradda 1aad xarafka (t) waxaa loo tixgelinayaa in uu noqdo shaqaalaha Guddiga, helana xuquuq la mid ah shaqaalaha kale, waxaana looga baahan yahay in uu u hoggaansamo Dastuurka, xeerkan iyo xeerarka kale ee la xariira arrimaha anshaxa, hoggaaminta iyo amar kasta oo ka soo baxa Guddiga.

**x)** Marka la xulanayo shaqaalaha waa in la dhawraa sinnaanshaha jinsiga ee fursadaha shaqo-qorista.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
جمهورية الصومال الفيدرالية
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
مجلس الشيوخ
AQALKA SARE

## CUTUBKA SADDEXAAD

## DADKA LAGU QAADI KARO DEMBIYADA MUSUQ-MAASUQA

### Qodobka 26aad

### Dadka Lagu oogi karo Dembiyada Musuq-maasuqa

Saraakiisha dawladda iyo shakhsiyaadka kale ee soo socda waxaa lagu oogi karaa dembiyada musuq-maasuqa ama dembiyo la xiriira:

**b)** Qof walba oo loo doortay ama loo magacaabay hay'ad dawladeed oo hoos imaanaysa qodobada Dastuurka iyo shuruucda kale;

**t)** Qof kasta oo ka wakiil ah hay'ad dawladeed ama haya awood gaar ah;

**j)** Adeege dadweyne oo haya xil maamul;

**x)** Qof ku shaqeeya maamul ama xil agaasin ee hay'ad dawladdu leedahay, ha noqoto mid ganacsi ama hay'ad kale;

**kh)** Musharaxa ka diiwaan-gashan doorashada xafiis hay'ad dawladeed;

**d)** Qof u sharraxan ama loo doortay hay'ad dawladda hoose;

**r)** Qof ka shaqeeya hawlaha maamulka iyo maareynta ee hay'ad dawladda hoose;

**s)** Qof ka shaqeeya hawlo maamul ama maareyn ee hay'ad aan dawli ahayn taas oo ku shaqeysa awoodaha hay'adaha dawladda;

**sh)** Inta ay gaarsiisan tahay awoodda hay'adaha Garsoorka ayey ku xiran tahay, sarkaal guud oo ajanabi ah ama mas'uul ka wakiil ah urur dadweyne oo caalami ah, haddii musuq-maamuq lagu helo, waxaana ku oogi kara oo kaliya Guddiga heer federaal.

**dh)** Mas'uul ama wakiil hay'ad kasta oo sharci ku dhisan haddii ay u isticmaasho awoodeeda in ay lacag ku hesho, ama waxyaabo kale oo qiima leh, darajo ama faa'iido, asagoo leh saameyn sharci-darro ah ee go`aan sarkaal guud;

**c)** Shakhsi ama mas`uul ka wakiil ah hay'ad kasta oo sharci ku dhisan, si sharci-darro ah wax u soo bandhigta, wax u ballan-qaadda, lacag siiya ama darajo ama faa'iido sarkaal guud.

### Qodobka 27aad

### Ku Eedeynta Dembiga Musuq-maasuqa

1. Haddii uu Guddigu xaqiijiyo in sarkaal dawladeed ama qof kale uu geystay fal-dembiyeed musuq-maasuq ah, dadkaasi waxaa lagu eedeyn doonaa nooca dembiga musuq-maasuqa ee ay galeen.
2. Guddigu wuxuu dacwadda eedeysanayaasha u gudbin doonaa xafiiska Xeer-ilaalinta Guud si uu uga qaado tilaabada ku habboon ee sharciga waafaqsan.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA جمهورية الصومال الفيدرالية FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE مجلس الشيوخ

### Qodobka 28aad

### Garsooridda dembiyada Musuq-maasuqa ee Dibadda lagu galo

Xeerkani wuxuu qabanayaa muwaadiniinta Soomaaliyeed iyo dadka haysta jinsiyadda Soomaaliyeed ee Dalka Dibadiisa ku gala dembi ku aaddan Musuq-maasuq nooc kasta uu yahayba, iyadoo loo cuskanayo mabda' ku xusan qodobka 7aad ee Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.

## CUTUBKA AFARAAD

## BAARITAANKA MUSUQ-MAASUQA

### Qodobka 29aad

### Habraaca Lagu Go'aamiyo Xad-gudubka

1. Guddigu wuxuu billaabi karaa baaritaan marka uu dhaco dembi Musuq-maasuq, ha ahaado mid uu isagu curiyey ama mid ku salaysan cabasho uu **soo** gudbiyey qof caadi ah ama hay'ad kasta oo sharci ku dhisan.
2. Guddigu inta uu ku guda jiro baaritaanka, wuxuu xaq u leeyahay in uu u yeero qof ama wakiil hay'ad kasta oo uu rumeysan yahay in laga heli karo macluumaad dheeri ah oo kaalin ka qaadan kara howsha baarista musuq-maasuqa.
3. Natiijada ka soo baxa baaritaanka, Guddigu wuxuu u gubinayaa Hay'adaha Garsoorka ee awoodda u leh.
4. Tallaabooyinka baariseed ee lagu ogaado in dembi musuq-maasuq ah lagu kacay waa ay ka xiran yihiin dadweynaha.

### Qodobka 30aad

### Ka-warbixinta Musuq-maasuqa

1. Sarkaal kasta oo dawladeed iyo qof kasta oo loo xilsaaray hawl guud waxaa waajib ku ah in uu u soo gudbiyo Guddiga falalka la xiriira musuq-maasuqa ee uu la kulmo inta uu ku guda-jiro gudashada xilkiisa. Waajibka ka-warbixinta falalka la xiriira musuq-maasuqa wuxuu si gaar ah u saaran yahay:

   **b)** Saraakiisha Dawladda ee Hanti-dhawrka iyo xisaabiyaha Guud ee Dawladda;

   **t)** Saraakiisha Maamullada Dawladaha Hoose;

   **x)** Saraakiisha Bankiga Dhexe;

2. Sarkaalka guud ama qof loo xilsaaray hawl guud ee lagu waajib yeelay in uu ka-warbixiyo falalka la xiriira musuq-maasuqa sida uu qabo sharcigani ee si ogaal ah uga

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

baaqsada in uu soo sheego falalkaas waxaa lagu eedeynayaa dembiga waajib-gudasho la'aan ee ku xusan Qodobka 282 ee Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.

## Qodobka 31aad

## Ilaalinta qofka xogta dembiga gudbiya

1. Guddigu waa in uu ilaaliyo in aan la magacaabin qof kasta oo sheega warka dhaliyay in ay curiso baaritaan ku salaysan xeerka ama qof kale oo bixiyay hadal qoraal ah oo la xiriira wax kasta oo ka mid ah baaritaanka in uusan qof-kaasi naftiisa iyo sharaftiisa waxyeello ka soo gaarin xogta uu bixiyay.
2. Ku xad-gudubka Faqradda 1aad ee Qodobkan waxaa ka dhalanaya Ciqaabta ku xusan Qodobka 478 ee Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.

## Qodobka 32aad

## Baaritaan

Guddigu wuxuu sameyn karaa baaritaan ku aaddan hab-dhaqanka shakhsi kasta ama hay'ad qaanuuni ah oo lagu tuhmo in ay ku hawllan tahay dembi musuq-maasuq, wuxuuna Guddigu soo qaadanayaa amar maxkamadeed si uu u helo xogta uu u baahan yahay ee ku aaddan:

**b)** Xuquuqda hantida ee dalka iyo dibedda;

**t)** Dhigaallada bangiyada iyo hay'adaha maaliyadeed ee kale ee dalka iyo dibedda;

**j)** Saamiyada keydad ku jira hay'ado leh shakhsiyad qaanuuneed;

**x)** Xuquuqaha laga soo guuriyo xuquuqda qoraaga sida xuquuqda hal-abuurka iyo xuquuqaha kale ee hanti-aqooneedka;

**kh)** Ilaha dakhli; iyo

**r)** Dhammaan xogta iyo caddeynta kale ee uu Guddigu u arko in baahi ahaan ay meel-mar tahay si looga gun-gaaro baaritaankeeda.

## Qodobka 33aad

## Awoodda Baaritaan ee Guddiga

Si waafaqsan Xeerka Habka Ciqaabta Soomaaliyeed, Guddigu inta uu ku guda-jiro baaritaannada ku aaddan dembiyada musuq-maasuqa, wuxuu awood u leeyahay in uu:

**b)** Sameeyo u yeerid iyo in uu weydiisto diiwaannada la xiriira ruux walba, hay'ad kasta oo sharci ku dhisan ama hay'ad dawli ah;

**t)** Baaritaano ku sameeyo goobaha, si waafaqsan Cutubka 3aad, Qeybta 1aad ee Xeerka Habka Ciqaabta Soomaaliyeed;

**j)** U-yeeridda markhaatiyaal si su'aalo loo weydiiyo;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA — FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA — THE UPPER HOUSE — AQALKA

**x)** Weydiisto bangiyada iyo hay'adaha maaliyadeed ee kale macluumaad ku saabsan faahfaahino maaliyadeed oo ku aaddan qof lagu tuhunsan yahay in uu ku lug leeyahay/leedahay, iyaga oo u soo marayo Hay'adaha Garsoorka.

**kh)** Isagoo haysta amar maxkamadeed, faro bangiyada iyo hay'adaha maaliyadeed ee kale in ay xannibaan muddo dhan ilaa 30 (soddon) maalmood xisaabta-socota ee ruux ama hay'ad leh shakhsiyad qaanuuneed oo lagu tuhunsan yahay in uu ku lug leeyahay/leedahay dembi musuq-maasuq, iyadoo ay dhici karto in xannibaada si toos ah looga qaado xisaabta-socota haddii uusan jirin amar maxkamadeed oo faraya in xannibaadda lagu sii hayo;

**d)** Isagoo haysta amar maxkamadeed, la wareego ama xayiro hanti guurto ah oo ujeeddada khuseysa ama la xiriirta dembi ka dhalan kara Xeerkan;

**r)** Bixiyo amar ka joojinaya ruux lagu tuhunsanyahay ku-xad-gudub xeerka musuq-maasuqa in uu dibadda u dhoofo, inta la dhawrayo natiijada baaritaanka iyaga oo u soo marayo Hay'addaha Garsoorka.

**s)** Weydiisto gargaar hay'adaha xoojinta sharciga ee dalalka kale in ay sameeyaan baaritaano, xiritaano iyo la-wareegitaanno ka dhaca dalal shisheeye si waafaqsan heshiisyada iskaashiga ee xagga isugu gargaaritaanka sharciga ama khuseeya heshiisyada laba dhinac ama dhinacyo badan u dhexeeya iyagoo kaashanaya Hay'addaha Garsoorka ee dalka.

**sh)** Ka helo gacan-siin booliska iyo hay'adaha ku shaqada leh in ay wax xiraan, qabtaan, u dhacaan iyo la-wareegitaanno lid ku ah shakhsiyaad lagu tuhunsan yahay in ay ku lug leeyahiin dembi musuq-maasuq.

## Qodobka 34aad

## Haysasho Hanti Aan Qeexnayn

1. Guddigu wuxuu baari karaa sarkaal dawladeed ama qof kale oo lagu tuhmay in uu galay dembi musuq-maasuq, iyadoo la eegayo in uu:

   **b**) Haysto heer nololeed oo aan u dhigmin dakhligiisa ama ilihiisa dhaqaale; ama

   **t**) Gacanta ku hayo hanti aan u dhigmin dakhligiisa ama ilihiisa dhaqaale.

   **j**) Leeyahay hanti uusan awoodin in uu ka bixiyo xisaab lagu qanci karo sida uu ku helay lahaanshaheeda, gacan-ku-haynteeda ama maamuliddeeda. Caddeyntaasi waa in ay la xiriirtaa mid xaqiijinaysa caddeyn kale ee ku saabsan gelitaanka dembi musuq-maasuq.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA جمهورية الصومال الفيدرالية FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE مجلس الشيوخ AQALKA SARE

### Qodobka 35aad

### Soo-gudbin-la'aan Macluumaad

Mas'uul kasta oo dawladeed oo soo gudbin waaya warbixin la weydiistay sida uu qabo xeerkani, ama bixiya warbixin been ah, is-hortaaga ama ka-hor-yimaada wakiil Guddiga oo gudanaya xilkiisa, wuxuu gelayaa fal-dembiyeed, iyadoo lagu qaadayo ciqaabaha ku tilmaaman Qodobka 255 ee Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.

### Qodobka 36aad

### La Wareegidda Dheef Lagu Hantiyey Musuq-Maasuq

1. Hanti si xaaran ah uu ku hantiyay sarkaal dawladeed ama qof kale, sidoo kale qiimaha lagu hantiyey mudnaanshiyo gaar ahaaneed ama ka-faa'iidaysiyo waxaa lagu wareejinayaa khasnadda dawladda iyadoo loo marayo amar maxkamadeed.
2. Haddii sarkaal dawladeed ama qof kale uu diido in uu soo celiyo hanti si xaaran ah lagu hantiyey ama si ka-faa'iidaysiyo ah, wuxuu guddigu ka codsanayaa Maxkamadda in ay qiimeyso hantidaas, oggolaatana la-wareegisteeda oo lagu shubo khasnadda Dawladda.
3. Inta la sugaayo natiijada baaritaanka, Maxkamadda awoodda u leh waxay amri kartaa in tallaabooyin ku-meel-gaar ah laga qaado hantida sarkaal dawladeed ama ruux kale.

### Qodobka 37aad

### Xasaanadda Guddiga

1. Ma jirto dacwo ciqaab ah ama mid madani ah oo lagu soo oogi karo xubnaha Guddiga ee la xiriira gelitaanka ama ka-baaqsiga fal si niyad-sami ah iyagoo gudanaya waajibaadkooda ama fulinaya awoodaha Guddiga ama awoodo kale oo lagu siiyey Xeerkan.
2. Haddii ka-baaqsiga ama qaladka xaqiiqada uu keenaayo fal dambi gaar ah ma reebayo mas'uuliyadda ciqaabeed sida ku cad qodoba 28aad Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
جمهورية الصومال الفيدرالية
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
مجلس الشيوخ
AQALKA SARE

## CUTUBKA SHANAAD
## KA-HORTAGGA MUSUQ-MAASUQA

### Qodobka 38aad
### Istiraatiijiyadda La-dagaallanka Musuq-maasuqa

1. Guddigu wuxuu dejinayaa isla markaana hirgelinayaa istiraatiijiyad looga hortagayo musuq-maasuqa.
2. Istaratiijiyadda la-dagaallanka musuq-maasuqa waxaa soo gelaya istiraatijiyad xiriirro/warbaahinno loogu talo-galay wacyi-gelinta iyo waxbaridda dadweynaha;
3. Si loo fuliyo istaratiijiyadda la-dagaallanka musuq-maasuqa, Guddigu wuxuu soo jeedinayaa tallaabooyin wax looga bedelayo shuruuc isagoo u gudbinaya qoraal soo jeedin ah Golaha Wasiirrada.
4. Guddigu wuxuu soo saarayaa aragtiyo la xiriira hirgelinta istiraatiijiyadda la-dagaallanka musuq-maasuqa.

### Qodobka 39aad
### Ka-hortagga Falalka Musuq-maasuqa

Guddigu wuxuu dejinayaa barnaamijyo lagu ogaado, laguna baabi'in karo musuq-maasuqa iyo waxa sababa, kuwaas oo ay ka mid yihiin:

**b)** Bixinta macluumaadyo ay helaan dadweynaha, abuurista kooxo daneeya wada-xaajoodyada siyaasadda iyadoo la siinayo fursad ay soo-jeedin iyo faallo uga bixiyaan habab gaar ahaaneed ee kor-joogtaynta iyo kormeeridda;

**t)** Xaqiijinta daah-furnaan ballaaran iyo furfurnaan ku aaddan habraacyada la-socodka dawladda;

**j)** Talo-bixinno lagu hagaajinayo habraacyada lagu bixiyo shatiyada, ruqsadaha iyo sameynta nidaamyo tartan oo u furan dadweynaha iyo siinta muwaadiniinta fursado ay uga qeyb-galaan;

**x)** U-sharrixidda iyo u-abuuridda shaqooyin shaqaalaha rayidka ee xafiiskooda;

**kh)** Taageeridda ururada aan dawliga ahayn si loola socdo in ay laamaha Dawladdu u fuliyeen hawlahooda si qayaxan oo ay ku jirto danta muwaadiniinta, iskaashi iyaga lagala yeesho, macluumaad isweydaarsi iyo in si joogto ah loo wargeliyo dadweynaha;

**d)** Horumarinta xeerarka anshax-wanaagga ee ku aaddan qeybaha gaarka ah iyo kuwa dawliga ah;

**r)** Caddeynta go'aanada ay gaaraan laamaha dawladda si ay qaab dhammeystiran, furfurnaansho leh, oo fudud ay ugu gaaraan dadweynaha iyo daneeyeyaasha kale; iyo

**s)** Raadinta siyaabo lagu fududeeyo habraacyada maamul-xafiiseedka dawladda ee ku aaddan helitaanka iyo wax-ka-qabashada cabashooyinka iyo codsiyada muwaadiniinta.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

## Qodobka 40[aad]

## Wacyi-gelinta Dadweynaha iyo Waxbarashada

Guddigu wuxuu qabanayaa hawlaha wacyi-gelinta bulshada iyo taageeridda dadaallada kale si ay u horumariyaan wacyiga dadweynaha ee musuq-maasuqa, sababaha iyo sida looga hortagi karo, waa:

**b)** Ku-wargelinta muwaadiniinta arrimaha ku saabsan sharciga la-dagaallanka musuq-maasuq oo lacag la'aan ah si ay u helaan macluumaaad;

**t)** Caawinta goobaha waxbarashada iyo hay'adaha dhaqaalaha in lagu tababaro, loona sharraxo ardayda iyo shaqaalaha xumaanta musuq-maasuqa iyo iyagoo gacan ka geysta aqoonta, wacyi-galinta iyo ka hortagga musuq-maasuqa; iyo

**j)** Wada-shaqaynta iyo caawinta hay'adaha warbaahinta in ay si joogto ah u faafiyaan warar iyo macluumaad ku saabsan xumaanta musuq-maasuqa si kor loogu qaado dareenka dadweynaha ee ku aaddan waxyeellada musuq-maasuqa.

## Qodobka 41[aad]

## Tababarka

1. Guddigu wuxuu diyaarinayaa qorsheyaal tababar oo ku saabsan arrimaha musuq-maasuqa ee ka jiri kara hay'adaha dawliga ah, ururrada bulshada rayidka, saxaafadda, hay'adaha waxbarashada, bahda ganacsatada iyo hay'adaha kale ee sharciga ku dhisan.
2. Guddigu wuxuu ka gacan-siinayaa dhanka horumarinta iyo qorsheyaasha tababarrada ee shaqaalaha rayidka iyo hawl-wadeennada laamaha dawliga iyo maxkamadaha ku hawlan ka hortaga musuq-maasuqa.

## Qodobka 42[aad]

## Cilmi-baaris iyo Kormeerid

1. Guddigu wuxuu sameynayaa cilmi-baaris ku saabsan arrimaha musuq-maasuqa iyo sidii loola dagaalami lahaa, cilmi baaris iyo kormeerka tira-koobka xogta, soo-jeedinta isbedello lagu sameeyo habka ururinta iyo qaabeynta xogta ku saabsan kormeeridda musuq-maasuqa; arrimaha ku aaddan kormeeridda, Guddigu wuxuu:

   **b)** Dib-u-eegis ku sameynayaa qaababka maareynta maamulka ee dhammaan laamaha dawliga;

   **t)** Talo u soo-jeedinayaa madaxda laamaha dawliga si ay isbedello u sameeyaan haddii Guddigu uu helo in qaabka maareynta maamul uu ugu muuqdo musuq-maasuq.
2. Guddigu wuxuu diyaarinayaa warbixinno saddex-biloodle ah oo baaritaankiisa ku aaddan, heerka musuq-maasuqa, kana dhigaan warbixin uu qofkasta ku heli karo si sahlan oo lacag la'aan ah.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
جمهورية الصومال الفيدرالية
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

## Qodobka 43aad

## Iskaashiga La-dagaallanka Musuq-maasuqa

1. Guddigu waxay iskaashi la sameynayaan ururada cilmi-baarista, saxaafadda, ururada bulshada rayidka ah, hay'adaha iyo ururrada kale ee xagga la-dagaallanka musuq-maasuqa.
2. Iskaashiga ku xusan faqradda 1aad ee isla qodobkan wuxuu la xiriiraa hawlaha ku aaddan hirgelinta barnaamijyada waxbarashada ee istiraatijiyadda la-dagaallanka musuq-maasuqa, lafa-guridda musuq-maasuqa, ololeyaal saxaafad iyo hawlo kale ee ku aaddan ka-hortagga musuq-maasuqa.

## Qodobka 44aad

## Iskaashiga Hay'adaha Dawliga ah

1. Booliska, xeer-ilaaliyeyaasha, hanti-dhowraha guud, xisaabiyaha guud ee dowladda, laanta garsoorka, laanta sharci-dejinta iyo hay'ad kasta oo sharci ku dhisan waa in ay Guddiga la yeeshaan iskaashi ku aaddan la-dagaallanka musuq-maasuqa.
2. Marka uu codsiga Guddiga soo gaaro laanta garsoorka, laanta sharci-dejinta, iyo hay'adaha kale ee sharciga ku dhisan lehna awood maamul, waxaa looga baahan yahay in ay ku gudbiyaan 30 (soddon) maalmood gudahood, laga bilaabo taariikhda helitaanka codsiga, dhammaan dukumiintiyada iyo macluumaadka si meel-mar ah loogu baahan yahay si uu Guddigu u guto hawshiisa.
3. Guddigu wuxuu dabagal ku sameynayaa isku-duwidda hawlaha iskaashi ee ku aaddan la-dagaallanka musuq-maasuqa ay ku kacaan laamaha dawladda.
4. Guddiyada la-dagaallanka musuq-maasuqa ee heer dawlad goboleed waa in ay iskaashi dhaw la yeeshaan Guddiga la-dagaallanka musuq-maasuqa ee heer federaal.

## Qodobka 45aad

## Iskaashiga Hay'adaha Caalamiga ah

1. Guddiga heer federaal wuxuu, isagoo kaashanaya laamaha dawliga ah ee ay khusayso dabagal ku sameynayaa isku-duwidda hawlaha iskaashiga caalamiga ee lagula dagaalamayo musuq-maasuqa ay galaan laamaha dawliga iyo hay'adaha kaleba.
2. Laamaha dawladda waa in ay ku-wargeliyaan Guddiga heer federaal dhammaan hawlahooda iskaashiga caalamiga ah ee ku aaddan la-dagaallanka musuq-maasuqa.

## Qodobka 46aad

## Diiwaannada

1. Guddigu wuxuu keydinayaa Diiwaannada hoos ku xusan:
   **b)** Diiwaanka saraakiisha dawladda;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA جمهورية الصومال الفيدرالية FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE

t) Diiwaanka hadiyadaha ee saraakiisha dawladda;

j) Diiwaanka warbixinnada laga sameeyey dhammaan baaritaannada, natiijooyinka la helay iyo go'aannada; iyo

x) Diiwaanka warbixinnada sanadlaha iyo saddex-biloodlaha ah.

2. Guddigu wuxuu sidoo kale kaydinayaa wixii kale ee dukumiintiyo ah si waafaqsan sharciga.

## Qodobka 47aad

## Ilaalinta Xogta Shakhsiga

1. Guddigu wuxuu ilaalinayaa xogta shakhsiga, gaar ahaan xogta saraakiisha dawladda iyo dadka la xiriira, marka lagu waayo in ay galeen dembi musuq-maasuq.
2. Guddiga ayaa xaddidaya faafinta macluumaadka saameynta gaarka ah ku leh dadka caadiga ah iyo hay'ad kasta oo sharci ku dhisan, haddii lagu helo dacwad ku saabsan in ay galeen dembi musuq-maasuq.

# CUTUBKA LIXAAD

# QODOBBO KU-MEEL-GAAR IYO GUNAANAD AH

## Qodobka 48aad

## Dejinta Xeer Nidaamiyaha

## Hirgelinta Sharciga iyo Xeer-hoosaadyada Guddiga

1. Wasiirka Caddaaladda ee heer federaal wuxuu muddo lix bilood gudahood ah ku soo diyaarinayaa xeer nidaamiyaha hirgelinta sharcigan, wuxuuna u gudbinayaa Golaha Wasiirrada si uu u ansixiyo, Goluhuna wuxuu ugu gudbinayaa Madaxweynaha JFS si uu u saxiixo looguna soo saaro faafinta rasmiga ah.
2. Guddigu wuxuu soo saarayaa xeer-hoosaadyo uu ku hirgelinayo sharcigan muddo 60 (lixdan) maalmood gudahood ah laga billaabo marka guddiga la dhiso.
3. Guddoomiyaha wuxuu soo saarayaa tilmaamo ku aaddan hawl-gallada Guddiga muddo 90 (sagaashan) maalmood gudahood ah laga bilaabo taariikhda la ansixiyay Guddiga.

## Qodobka 49aad

## Xallinta Iska-hor-imaadka Xeerarka

Haddii qodob ka mid ah sharcigan ay iska hor-yimaadaan qodobada Xeerka Ciqaabta ama Xeerka Habka Ciqaabta waxaa gacan-sarreynta yeelanaya Xeerka Ciqaabta ama Xeerka Habka Ciqaabta.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA جمهورية الصومال الفيدرالية FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE

### Qodobka 50aad
### Baabi'in

Xeerkani wuxuu baabi'inayaa xeer kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin.

### Qod. 51aad
### Dhaqan-gal

Sharcigani wuxuu dhaqan-gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JFS, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

Tusmada Sharciga

# CUTUBKA KOOWAAD

HORDHAC ........................................ 1

Qodobka 1aad

Xeerka Dhismaha Guddiyada Madaxa-bannaan ee La-dagaallanka Musuq-maasuqa ee Labada Heer..... 1

Qodobka 3aad

Ujeeddada Xeerka........................................ 2

# CUTUBKA LABAAD

GUDDIGA........................................ 2

Qodobka 4aad

Xarunta Guddiga Heer Federaal........................................ 2

Qodobka 5aad

Maqaamka Sharciyeed ee Guddiyada La-dagaallanka Musuq-maasuqa ........................................ 3

Qodobka 6aad

Xilka Guddiga ........................................ 3

Qodobka 7aad

Awoodaha Guddiga ........................................ 3

Qodobka 8aad

Miisaaniyadda Guddiga ........................................ 5

Qodobka 9aad

Xubnaha Guddiga........................................ 5

Qoddobka 10aad

Xulista Xubnaha Guddiga ........................................ 5

Qodobka 11aad

Shuruudaha Xubnaha Guddiga ........................................ 6

Qodobka 12aad ........................................ 7

Dhaarinta Xubnaha Guddiga ........................................ 7

Qodobka 13aad

Muddada Xil-haynta Xubnaha Guddiga ........................................ 7

Qodobka 14aad

Shaqo-ka-joogsashada Xubnaha Guddiga........................................ 7

Qodobka 15aad

Xil-ka-qaadis Xubin Guddiga ........................................ 7

Qodobka 16aad

Doorashada Guddoomiyaha iyo Guddoomiye Ku-xigeenka ........ 8

Qodobka 17aad

Xilka Guddoomiyaha ........ 8

Qodobka 18aad

Xilka Guddoomiye Ku-xigeenka ........ 9

Qodobka 19aad

Muddada Xil-haynta Guddoomiyaha & Guddoomiye Ku-xigeenka ........ 9

Qodobka 20aad

Go'aannada Guddiga ........ 9

Qodobka 21aad

Qaybaha Guddiga ........ 9

Qodobka 22aad

Warbixinnada Guddiga ........ 10

Qodobka 23ad

Xoghaynta ........ 10

Qodobka 24aad

Xil-ka-qaadista Xoghayaha ........ 11

Qodobk 25aad

Shaqaalaha Guddiga ........ 11

**CUTUBKA SADDEXAAD**

DADKA LAGU QAADI KARO DEMBIYADA MUSUQ-MAASUQA ........ 12

Qodobka 26aad

Dadka Lagu oogi karo Dembiyada Musuq-maasuqa ........ 12

Qodobka 27aad

Ku Eedeynta Dembiga Musuq-maasuqa ........ 12

Qodobka 28aad

Garsooridda dembiyada Musuq-maasuqa ee Dibadda lagu galo ........ 13

**CUTUBKA AFARAAD**

BAARITAANKA MUSUQ-MAASUQA ........ 13

Qodobka 29aad

Habraaca Lagu Go'aamiyo Xad-gudubka ........ 13

Qodobka 30aad

Ka-warbixinta Musuq-maasuqa ........ 13
Qodobka 31aad
Ilaalinta qofka xogta dembiga gudbiya ........ 14
Qodobka 32aad
Baaritaan ........ 14
Qodobka 33aad
Awoodda Baaritaan ee Guddiga ........ 14
Qodobka 34aad
Haysasho Hanti Aan Qeexnayn ........ 15
Qodobka 35aad
Soo-gudbin-la'aan Macluumaad ........ 16
Qodobka 36aad ........ 16
La Wareegidda Dheef Lagu Hantiyey Musuq-Maasuq
Qodobka 37aad ........ 16
Xasaanadda Guddiga ........ 16

## CUTUBKA SHANAAD

KA-HORTAGGA MUSUQ-MAASUQA ........ 17
Qodobka 38aad
Istiraatiijiyadda La-dagaallanka Musuq-maasuqa ........ 17
Qodobka 39aad
Ka-hortagga Falalka Musuq-maasuqa ........ 17
Qodobka 40aad
Wacyi-gelinta Dadweynaha iyo Waxbarashada ........ 18
Qodobka 41aad
Tababarka ........ 18
Qodobka 42aad
Cilmi-baaris iyo Kormeerid ........ 18
Qodobka 43aad
Iskaashiga La-dagaallanka Musuq-maasuqa ........ 19
Qodobka 44aad
Iskaashiga Hay'adaha Dawliga ah ........ 19
Qodobka 45aad
Iskaashiga Hay'adaha Caalamiga ah ........ 19

Qodobka 46aad

Diiwaannada ........................................................................................................................ 19

Qodobka 47aad

Ilaalinta Xogta Shakhsiga ........................................................................................................... 20

## CUTUBKA LIXAAD

QODOBBO KU-MEEL-GAAR IYO GUNAANAD AH ....................................................................... 20

Qodobka 48aad

Dejinta Xeer Nidaamiyaha Hirgelinta Sharciga iyo Xeer-hoosaadyada Guddiga ..................................... 20

Qodobka 49aad

Xallinta Iska-hor-imaadka Xeerarka ............................................................................................. 20

Qodobka 50aad

Baabi'in .................................................................................................................................... 21

Qod. 51aad

Dhaqan-gal ................................................................................................................................. 21